

**Dadaab: Midowga Yurub oo horumarinaayo fursadaha waxbarasho ee caruurta iyo dalinyarada Soomaaliyeed ee xeryaha qaxootiga**

**12/04/2013**

Maanta, Midowga Yurub iyo shurakiisa, Save the Children, Norwegian Refugee Council, Lutheran World Federation, Association of Volunteers International Service iyo Windle Trust waxay bilaabeen Barnamijka *Taagyeeridda Waxbarashada Xeyaha Qaxootiga Dadaab*(SERD). Barnamikan uu maalgeliyey Midowga Yurub soonna doonana 36 bilood waxay ujeedadiisu tahay in loo siiyo caruurta Soomaaliyeed ee ku nool xerada ugu weyn aduunka galaangal dheeraad ah waxbarasho rasmiga, mid aan rasmi ahayn iyo fursado tababaro xifadeed intaba.

Caruurta iyo dhalinyarada Soomaaliyeed ee ku nool xeryooyinkaas waxay ilaa hadda ku noolaayeen rajo la'aan. In badanoo ka mid ah weligoo ma arkin Soomaaliya wxayna runtti ku ahaayeen maxaabiis xeryooyin dadka buux-dhaafiyeen halkaasoo waxbarashadu ku yar tahay badelkeeduna fursadaha kasabka aan sharciga ahayn ay yihiin kuwa soo jiidasho leh halka dhalinyarada leh xirfadaha ay doonayaan in ay dib ugu laabtaan Soomaaliya si ay uga qayb qaataan dib u dhiska dalkooda. Sida ay tilmaamayaan warbixidadi dhawaa ee UNKa, kaliya 57,000 kana mid ah 221,000 ah caruurta iyo dhalinyarada gaartay da'da sanad dugsiyedka ayaa dugsi ka dhigta. Tirada ardayga si dhab ah u dhammaysata dugsiga aad ayey ugu yar yihiin iyadoo weliba tirade kuwa waxbarashada dhex ugu taga ay aad u sarayso gaar ahaan gebdhaha.

Deeqdan cusub ee Midowga Yurub ee gaaraysa 3.5 milyan EUR waxay hagaajin doontaa heerka kaabayaasha dugsiyada, waxay kordhinaysaa tirada macallimiinta tababaran, waxay dhisaysaa awood maamul ee dusgiyadda waxayna balaarinaysaa fursadaha tababarada xirfadeed. Fal-galku wuxuu sahmin doonaa qaabab cusub ee lagu heli karo waxbarashada assasiga sida habka dhamaysitan ee dugsiga ka hor, Banaamijyada wabarashada deg-dega ah iyo dugsiyada guur-guura. Iyadoo lagu kaabayo guulaha Barnamijka Waxbarashada Baahdsan Soomaaliyeed ayaa Midowga Yurub wuxuu ku taagyeeri doonaa tiro kooban oo deeq waxbarasho kuwa dhammaysta dugsiyada sare Dadaab si ay u sii wataan waxbarasho jaamacadeed.

Gebdhaha, oo ah kuwa sida weyn ugu wax la' nidaamka waxbarashada rasmiga ee ka jira xeryaha iyo kuwa kalee deegaanada martiliyey, ayaa lagula beegsan doonaa si gaar ah. Banaamijka wuxuu tiigsanayaa inuu horumariyo fursadahooda ay ku tegi lahaayeen, uguna qayb geli lahaayeen ayna ku sii wadan lahaayeen dugsiga.

Taagyeerada Midowga yurub ee waxbarashada Soomalida qaxootiga Dadaab waxay ku xiriirsan tahay Isteraatijiyyada Waxbarashada Dadaab ee 2012-2015 taasoo isku dayeya in la de-dejiyo helitaanka waxbarasho taya leh ee xeryaha Dadaab iyo degaannada martigeliyey ee ku hareereesan. Taagyeerada Midowga Yurub waxaa lagu fulin doonaa iyadoo is dhow lala kaashanaayo UNCHR, UNICEF iyo shurakada kale waxbarashada si loo balaariyo faaidada u sugnaaneysa kuwa loo qasdaayo in ay helaan ee jooga xeryaha. **Dhammaad**

